Karlskoga

# Warbixin ku saabsan waajib ahaanshaha dugsiga

Dhammaan carruurta dhigata fasalka barbaarinta, dugsiga hoose-dhexe ama dugsiga hoose-dhexe ee la waafajiyay baahiyaha gaarka, kulligood waxaa saaran waajib dhigasho dugsiyeed. Taas macnaheedu waa in ay khasab ku tahay inay dugsiga aadaan oo ay ka qeyb qaataan waxbarashada maalin-dugsiyeed kasta.

Adiga ka waalid ahaan waxaad masuul ka tahay in ilmahaaga uu tago dugsiga. Dugsiguna wuxuu masuul ka yahay in ilmaha uu ka qeyb qaato waxbarashada.

Ilmo waxa uu dugsiga ka maqnaan karaa haddii uu heysto cudurdaar sax ah. Cudurdaar sax ah waxaa tusaale ahaan noqon kara haddii uu ilmuhu xanuunsan yahay ama uu fasax ka heysto mudiirka iskuulka.

Maamulaha dugsiga ilmaha ayaa go'aamiya haddii ilmuhu helo fasax. Maamulaha wuxuu fasax siin karaa haddii ay jirto sabab gaar ah, tusaale ahaan, aaska qof dhintay. Maamulaha sidoo kale wuu diidi karaa fasaxa.

Haddii aad tusaale ahaan qorsheyneysaan fasax, waa inaad fasax dalbataan waqti hore. Hadduu maamulaha diido fasaxa, markaas ilmaha looma oggola inuu dugsiga ka maqnaado.

Haddii uu ilmaha haddana maqnaado iyadoo aysan jirin sabab sax ah, adiga ka waalid ahaan waxaad waajihi kartaa in lagu ganaaxo (lacag). Safar aan maamuluhu oggolaan waxa uu tusaale u yahay maqnaansho aan sharci ahayn.